



Meelaha laga helo tallaalka ee gudaha King County

Tallaallada carruurta

Gobolka Washington, dhammaan carruurta da'doodu u dhexeyso 0-18, waxay heli karaan tallaallo joogto ah **oo kharash la'aan ah**, iyagoo ka helaya dhaqtar daryeel-caafimaad oo ka qaybqaata Barnaamijka Tallaalka Carruurnimada (CVP).

Dhaqtarka daryeelka caafimaadka ilmahaaga

Waxaad sidookale fursaddaan u isticmaali kartaa inaad ka hadasho wixii walaacyo caafimaad oo kale ah.

Xarumaha Caafimaadka ee Ku Yaal Dugsiga (SBHCs)

Carruurta ku nool degmo leh SBHC waxay heli karaan tallaalka saacadaha shaqada.

Farmashiyeyaasha

Farmashiyeyaasha badankood waxay aqbalaan ceymis ama waxay ka qaataan lacag jeeb-ka-bixis ah.

Rugaha Wareega

Booqo kingcounty.gov/findaclinic si aad u aragto liiska rugaha caafimaadka ee soo socda iyo si aad u ogaato inaad u qalanto iyo in kale.



Tallaallada dadka waaweyn

Ka hubi dhaqtarka daryeelka caafimaadkaaga ama farmashi maxalli ah

Qorsheyaasha ceymisku badankood waxay daboolaan tallaallada lagula taliyay dadka waaweyn, oo ay ku jiraan Medicaid (Apple Health) iyo Medicare. Medicare, la xirii ceymiskaaga si aad u ogaato tallaallada la daboolay.

Dadka waaweyn ee aan ceymiska lahayn ee da'doodu tahay 19 ama ka weyn

Dhakhaatiirta qaarkood waxay siiyaan tallaalo kharash la'aan dadka waaweyn ee aan caymiska lahayn iyadoo loo marayo Barnaamijka Tallaalka Dadka Waaweyn (AVP).



Marwalba xasuuso inaad...



Wacdo dhaqtarkaaga daryeelka caafimaadka ama farmashiga wakhti hore si aad u weydiiso kharashka, helitaanka tallaalka, da'da loo adeego, iyo inaad ballan qabsato.



U booqo kingcounty.gov/vaxmap si aad u heshid meesha aad ka heli karto **tallaallada kharash la'aan ah** ee carruurta iyo dadka waaweyn ee aan caymiska lahayn.



U booqo kingcounty.gov/findaclinic wixii macluumaad dheeraad ah.

Somali
10/16/25



Meesha loo aado...

Farmashiyeyaasha tallaala dhallaanka iyo socod baradka

Bob Johnsons Pharmacy

(206) 782-5822
Crown Hill, Seattle
www.bobjohnsonsparmacy.com

Katterman's Pharmacy

(206) 524-2211
Sand Point, Seattle
www.kattermans.com

Cascadia Pharmacy

(206) 385-6552
Wallingford, Seattle
www.cascadiapharmacy.com

Bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka ee aan kaaga baahnayn inaad isu diiwaangeliso bukaan ahaan

HealthPoint Community Health Centers

(Kulli goobaha Redmond mooyaane)
www.healthpointchc.org

Intergalactic Pediatrics

(206) 203-2509
Lake City, Seattle
www.intergalacticpediatrics.com

Optum Care Washington

www.optumwa.com

Sea Mar Community Health Centers

www.seamar.org

✖ = Caruurta oo kali ah baa heli kara tallaalka ayagoon noqon bukaanno.

Farmashiyeyaasha tallaala dadka aan caymiska lahayn

Othello Station Pharmacy

(206) 620-2400
Othello, Seattle
www.othellostationrx.com

Kelley-Ross

(Tallaallo kharash la'aan ah ee dadka waaweyn oo keliya)
www.kelley-ross.com

Liiskan ma dhammeystirna. Macluumaadka boggaan waa la bedeli karaa. U booqo kingcounty.gov/findaclinic wixii macluumaad dheeraad ah.

Xarumaha caafimaadka qaarkood waxay leeyihiin meelo badan. Ka fiiri bog-khadka macluumaadka xiriirka.

Farmashiyadu waxay bixiyaan doorashooyin tallaalo oo kala duwan. Marwalba wac wakhti hore si aad u weydiiso kharashka, helitaanka tallaalka, da'da loo adeego, iyo inaad ballan qabsato.



U booqo kingcounty.gov/vaxmap si aad u heshid meesha aad ka heli karto **tallaalo kharash la'aan ah** ee carruurta iyo dadka waaweyn ee aan caymiska lahayn.



U booqo kingcounty.gov/findaclinic wixii macluumaad dheeraad ah.

